

# WAALIDDIINTA WUXUU WAAJIB KA SAARAN YAHAY INAY SAMEEYAAN DADAAL KASTA OO AY KU ILAALINAYAAN GABADHOODA

Cidda ay tahay in lala soo xiriiri haddii ay khatar jirto?

## DIBADDA?

- The Inter-African Committee on Traditional Practices:  
<http://www.iac-ciaf.net>
- Liiska Safaaradaha Belguim uu ku leeyahay dalaka dibadda:  
<http://diplomatie.belgium.be>

## GUDAHA BELGIUM?

- Ama lambarrada lacag-la'aanta ah: **1712** oo si gaar ah loogu talagalay shaqsiyaadka ka cabanaya rabshado ama meel-kadhac (Bulshada Flemish) ama **103** Ecoute Enfants (Bulshada Faransiiska)
- INTACT: **+32 (0)499 83 29 42**

Dhammaan macluumaadka ku saabsan Gudniinka Fircooniga (FGM), fadlan kala xiriir ururrada soo socda:

- GAMS Belgium: **+32 (0)2 219 43 40 - [www.gams.be](http://www.gams.be)**
- INTACT: **+32 (0)499 83 29 42 - [www.intact-association.org](http://www.intact-association.org)**
- Le Centre de Planning Familial des FPS de Liège: **+32 (0)4 223 13 73 - [www.planningsfps.be](http://www.planningsfps.be)**




SOMALI

# SHARCIGA BELGIUM WUU MAMNUUCAYAA

Gudniinka  
Fircooniga

halkan iyo dibaddaba



Federal Public Service  
**Justice**



**KINGDOM OF BELGIUM**  
Federal Public Service  
**Foreign Affairs,  
Foreign Trade and  
Development Cooperation**



federal public service  
**HEALTH, FOOD CHAIN SAFETY  
AND ENVIRONMENT**

## WAA MAXAY GUDNIINKA FIRCOONIGA?

Gudniinka Fircooniga waa goynta qeyb ka mid ah ama gebi ahaanba qeybta dibadda ku taalla ee xubinta taranka ee haweenka, iyadoo aanay jirin sababo la xiriira daawo.

## MAXAY TAHAY SABABTA LOO SAMEEYAY DUKUMEENTIGAN?

Dukumeentigan wuxuu kuu oggolanayaa inaad qoyskaaga u sharraxdo in Gudniinka Fircooniga (FGM) uu mamnuuc ka yahay dalka Belgium iyo inaad khatar ugu jirto in xabsi lagu dhigo goynta xubinta taranka ee gabadhaada, xitaa haddii aad ku soo gudday dalka Belgium dibaddiisa.

**Waad haysan kartaa dukumeentigan marka aad safrayso si aad u tusto qoyskaaga haddii aad cadaadis kala kulmeyso inaad raacdo dhaqankan.**

## CAAFIMAADKA GABDHAA DA'DA YAR IYO DUMARKA

Gudniinka Fircooniga (FGM) wuxuu cawaaqib halis ah oo dhinaca caafimaadka ah ku leeyahay gabadhaha iyo haweenka. Qaar ka mid ah saameyntiisa isla markiiba waa ay soo if-baxaan, sida dhiig la'aan iyo/ama caabuq halis ah, oo mararka qaarkood horseedi kara dhimasho. Saameyn kalena waxay soo if-bixi karaan goor dambe: gabadha oo xanuun badan kala kulanta caadada, caabuq xubnaha taranka haweenka ah oo horseedi kara ma-dhalaysnimo, galmada oo xanuun badan ku yeelata gabadha, dhibaatooyin daba-dheeraada oo dhinac kaadida ah, raadreeb xilliga ay haweeneydu dhaleyso, iyo sidoo kale walaac, niyad-jab iyo murugo.

## SHARCIGA AYAA MAMNUUCAY GUDNIINKA FIRCOONIGA (FGM)

Sharciga caalamiga ah wuxuu u tixgeliyaa jarjaridda gabdhaha iyo haweenka fal ka baxsan bin'i'adannimada iyo dhaqan lagu sharaf ridayo gabadha oo u dhigma jir-dil. Shaqsi kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ilaashado sharafka maskaxdiisa iyo jirkiisa.

## Caalamka?

Heshiiska Maputo (2003) ee gudaha Afrika wuxuu ugu baaqayaa dalalka inay mamnuucaan dhammaan noocyada Gudniinka Fircooniga, iyadoo u maraya tallaabooyin sharci ah iyo cunaqabatayn intaba. Dalalka Senegal, Burkina Faso, Togo iyo Ivory Coast dhaqankan waxaa mamnuucaya sharciga.

## Belgium Gudahiisa?

Gudniinka Fircooniga (FGM) waxaa sidoo kale mamnuucaya sharciga u yaalla dalka Belgium, waxaana loo tixgeliyaa inuu yahay meel-ka-dhac.

Xukun xabsi ah oo 3 ilaa 5 shan ah ayaa lagu ridaa "qof kasta oo ka qeyb-galay, fududeeyay ama dhiirri-geliyay nooc kasta oo Gudniin ah oo lagu sameeyo haweenka, ama isku dayay inuu sidaas sameeyo, ha haysto fasaxeeda ama yuusan haysan". Haddii gudniin lagu sameeyay gabar ka yar 18, xukunka wuu ka sii cuslaan karaa. Ma aha oo kaliya in qofka sameeyay gudniinka in dambi lagu soo oogi karo ama lagu ciqaabi karo gudaha Belgium, sidoo kale qofka gacan siiyay dambiilaha ayaa dambi lagu soo oogi karaa lana ciqaabi karaa (Qodobka. 409 Xeerka Ciqaabta Belgium).

Tan micnaheedu wuxuu yahay in waaliddiinta dambi lagu soo oogi karo gudaha Belgium haddii gabadhooda lagu soo gudahay dibadda (Qodobka. 10 ter/CICr).